# Ka shaqee Iswiidhan

## Qaado tillaabooyinka kordhinaya fursadahaaga shaqada

# Salaan!

Buug-yarahan waxaa loogu talagalay qofka shaqo doonaya. Iswiidhan ayaa dadka oo dhan loo baahan yahay, laakiin way adkaan kartaa inaad shaqo hesho, haddii, tusaale ahaan waxbarasho ama khibrad shaqo aanad lahayn. Halkan ayaad ka heli doontaa tilmaamo ku saabsan waxaad samayn karto si aad fursadahaaga shaqada ugu kordhiso. Soo ogow waxa aad adigu rabto oo qorshee jidkaaga mustaqbalka.

**Nasiib wanaagsan!**

# Tusmada


**Hordhac** ........ 2

Qaybta 1

**Shaqada Iswiidhan** ........ 4

**Xagee ayaan shaqooyinka bannaan ka heli karaa?** ........ 5

**Sideen ayaan shaqo u raadsadaa?** ........ 6

**Maxaan rabaa inaan ka shaqeeyo?** ........ 7

Qaybta 2

**Sameyso awood xirfadeed iyo xiriiro** ........ 8

**Sidee ayaan luqadda u baran karaa?** ........ 8

**Sidee ayaan xiriiradayda caawimo uga heli karaa?** ........ 9

**Waxbarashooyin noocee ah ayaa igu habboon?** ........ 10

**Taageero noocee ah ayaan ka heli karaa Arbetsförmedlingen?** ........ 11

Qaybta 3

**Qoyska iyo shaqada** ........ 12

**Sidee ayaan iskugu qaban karaa shaqo iyo inaan guriga daryeelo?** ........ 12

**Maxay carruurtu dugsiga barbaarinta/xannaanada carruurta ku sameeyaan?** ........ 13

Qaybta 4

**Marka ay jiraan waxyaabo nolosha la xiriira oo adkeynaaya in la shaqeeyo** ........ 14

**Maxay tallaabadaada xigtaa noqon doontaa?** ........ 15

# Shaqada Iswiidhan

**Qaybtani waxay ku saabsan tahay**

- **shaqooyinka kala duwan ee Iswiidhan**
- **halka ayaad ka heleyso shaqooyinka bannaan**
- **sida aad shaqooyinka u raadsanayso.**

## Shaqooyin noocee ah ayaa jira?

Waxa jira adeeg aad arbetsförmedlingen.se ka helayso halkaas oo aad xirfadaha kala duwan ee Iswiidhan wax badan ka baran karto. Waxa adeegga la yiraahdaa ”Hitta yrken” (hel xirfad/mihnad).




**Ku sawir/ iskaangaree lambarka QR-koda telefoonkaaga**

**Shaqooyinkee ayaa qaar xiiso leh iila muuqda?**

# Xagee ayaan shaqooyinka bannaan ka heli karaa?

Siyaabo badan oo shaqo loo raadsado ayaa jira. Waxaad ka raadsan kartaa xayaysiisyada Platsbanken ee arbetsförmedlingen.se. Halkaas ayay shaqooyin badan oo bannaani ku jiraan. Laakiin waxa sidoo kale jira siyaabo kale oo wanaagsan.

Waxaad tusaale ahaan
- weydiin kartaa dadka aad taqaano
- shaqo ka raadsan kartaa baraha bulshada, tusaale ahaan Facebook
- la xidhiidhi kartaa loo shaqeeye/shaqo bixiye oo aad weydiin kartaa haddii ay boosas shaqo oo bannaani jiraan
- samee tababar shaqo (praktik).

Haddii aad tababar shaqo sameyso adiga oo Arbetsförmedlingen soo maraaya ayaad Arbetsförmedlingen gunno ka heli kartaa. Markaad tababarka shaqada sameyso ayaad khibrad heli doontaa waxaanad ku baranaysaa luqadda.

## Siday Frishta shaqada ku heshay

Markii ay Frishta oo 22 jir ah ay Iswiidhan ugaga timid Afgaanistan ayaanay waligeed soo shaqayn, laakiin laba bilood oo ay dukaan tababar ku samaysay kadib ayaa halkaas shaqo laga siiyey.

– Way adagtahay in halkan Iswiidhan shaqo laga helo iyadoo aan wax khibrad ah lahayn, sidaa darteed aad ayaan ugu farxay markii aan tababarka shaqada helay.

Intii ay tababarka shaqada ku jirtay ayay Frishta, tababar ku qaadatay hawlo shaqada oo kala duwan sida baakadaynta alaabaha iyo in dharka alaarm lagu xiro.

– Waxaan sidoo kale bartay iswidhish badan, erayo badan oo cusub waxaanan bartay dad cusub.

Markii uu tababarka shaqadu dhamaaday ayuu dukaanku u soo bandhigay shaqaaleyn taageero la siinayo. Waxaa loo yaqaanaa “nystartsjobb”. Waxay Frishta shaqada u aragtaa bilow wanaagsan oo qorshaheeda mustaqbalka ku saabsan.

– Toban sano gudahood ayaan rabaa inaan gaaro hadafkeyga ah inaan barto cilmiga dhaqaalaha, oo aan kadibna shirkad ugu shaqeeyo madaxa dhaqaalaha ama hanti dhowre.



**DHAGEYSO!**

Lyssna på

**Podd-ka - Ny i Sverige-podden: 10 talo oo khibrad ahaan kaa caawinaya si aad shaqo u hesho.**

**Af soomaali:**

**Waa maxay shaqooyinka aan jeclaan lahaa inaan isku tijaabiyo?**

# Sidee ayaan shaqo u raadsadaa?

Waxaad u baahan tahay inaad siyaabo kala duwan u diyaargarowdo si aad shaqo u hesho. Haddii aad shaqo la'aan tahay oo aad rabto inaad shaqo raadsato, ayaad iska diiwaan gelin kartaa Arbetsförmedlingen. Halkaas ayaad caawimo ka heli kartaa.

## Waxa badiyaa jira afar shay oo aad u baahan tahay inaad samayso si aad shaqo u hesho:

1. Raadso shaqooyinka bannaan ee aad rabto ee aad samayn karto.
2. Qor cv.
3. Qor warqad shakhsi ah.
4. U diyaargarow wareysiga shaqada!

## Waa maxay cv?

Waxaad, cv (curriculum vitae) aad ku qoraysaa waxa aad qaban karto iyo waxa aad soo baratay oo aad hore uga soo shaqaysay. Waa inuu ugu badnaan laba bog ahaado. Ogolow inuu qof aad ku kalsoon tahay cv akhriyo si uu eego haddii ay jiraan waxyaabo aad ka tagtay ama meelo laga yaabo inay u baahan yihiin inaad ka wanaajiso.



**DHAGEYSO!**

Dhageyso
**Podd-ka - Ny i Sverige-podden: U diyaargarow wareysiga shaqada**

## Waa maxay warqadda shaqsigu?

Waxaad warqadda shaqsiga ku sheegi kartaa sababta aad ugu haboon tahay shaqada aad dalbanayso. Waa inay warqaddaada shaqsiga ugu badnaan hal bog ahaato.



# Maxaan rabaa inaan ka shaqeeyo?

Ku qor jawaabaha su'aalaha meelaha hoose!

## 1. Maxaan anigu ku fiicanahay?


**Sifooyinka shaqsi ahaaneed ee aan ku wanaagsanahay ee aan rabayo inaan muujiyo marka aan shaqo dalbanayo.**

Tusaale ahaan:
Waxaan ku wanaagsanay inaan fikrado keeno
Waxaan ku wanaagsanay inaan wax qorsheeyo
Waxaan ku wanaagsanay xallinta dhibaatooyinka kala duwan

## 2. Maxaan hore uga soo shaqeeyey?

**Khibrada aan leeyahay ee aan rabo inaan iftiimiyo markaan shaqo raadinayo.**

Tusaale ahaan:
Waxaan ku soo shaqeeyey timo-jare
Waxaan ka soo shaqeeyay dhaqaalaha
Waxaan soo xanaaneeyey carruur



## 3. Maxaan rabaa inaan ka shaqeeyo?

**Hawlaha shaqada ee aan jeclahay.**

Tusaale ahaan:
Waxaan rabaa inaan dadka la shaqeeyo
Waxaan rabaa inaan kumbiyuutar ku shaqeeyo
Waxaan rabaa inaan gacmaha wax ka qabto

# Kasbo awood xirfadeed iyo xiriiro

**Qaybtani waxay ku saabsan tahay**

- **Sida aad iswiidhishka u baran karto**
- **Sida ayaad xiriiro cusub u kasban karto**
- **Noocyo kala duwan ee waxbarashada**

## Sidee ayaan luqadda u baran karaa?

Dad badan ayaa qaba inay barashada luqad cusubi adag tahay, laakiin waxaa jira dhowr siyaabood oo wanaagsan. Waa kuwan tusaale ahaan:

**Wax ku baro sfi (svenska för invandrare)**
Waxaad sfi-ga af Iswiidishka ku baran kartaa lacag la'aan. Ku dhowaad dhammaan dadka ku cusub Iswiidhan ayaa xaq u leyihiin sfi-ga. Waxa qaar ka mid ah degmooyinka xitaa ka jira sfi loogu talagalay dadka fasaxa waalidiinta ku jira. Markaas ayaad ilmahaaga sii kaxaysan kartaa markaad luqadda iswiidhishka ku tababaranayso. La xidhiidh degmada aad deggan tahay oo hubi waxa halkaas ka shaqeeya.

**Af iswiidhishka ku tababaro språkcaféer**
Waxaad språkcafée, ku tababaran kartaa iswiidhishka adiga oo kafee cabbaya isla markaana dad cusub la kulmaya. Waxaad språkcaféer ka heli kartaa tusaale ahaan, maktabada.

**Adigu iska bar internetka**
Ku bilow koorso fudud oo bilaash ah. La soo deg app-ka "Hej svenska" oo moobaylka ka tababaro luqadda iswiidhishka

**TALO!**

Waxa bogga internetka ee informationsverige. se ku jira macluumaad ku saabsan sida aad luqadda ugu tababaran karto.

### Luqadahee ayaad taqaanaa?

Inaad luqaddo badan taqaano ayaa faa'iido yeelan karta markaad shaqo raadinayso!

_______________________

_______________________

_______________________

# Sidee ayaan xiriiradayda caawimo uga heli karaa?

Dad badan ayaa shaqo ku hela iyaga oo adeegsanaya dadka ay yaqaanaan. Qof kasta oo aad taqaanaa waxa uu qayb ka yahay shabakadaada. Waxa uu noqon karaa qof saaxiib ah, qof deriska ama xiriirida aad ku leedahay baraha bulshada. Mararka qaar ayaynu u baahan karnaa inaynu dad cusub barano, sida marka aynu u guurno waddan cusub.

Haddii aad rabto inaad dad cusub barato ayaad isku dayi kartaa inaad:



**Ka qaybqaado waxqabadyada ay dadka kale soo abaabulaan**
Degmada, maktabadda iyo ururada kala duwan ayaa badiyaa qabanqaabiya waxqabadyo kala duwan oo aad dad cusub kula kulmi karto.

**Dad cusub baro adiga oo ilmahaaga u maraya**
Haddii aad tahay waalid ayaad tusaale ahaan la kulmi kartaa saaxiibka ilmahaaga waalidkiis ama waxaad la kulmi kartaa waalidiin kale adiga oo ka qaybqaadanaya naadiga ciyaaraha ee ilmahaaga.

**Ku biir jaaliyad ama urur**
Halkaa ayaad kula kulmi kartaa dad aad isku wax daneynaysaan ama xiisaynaya arrimo la mid ah kuwa aad xiiseynayso.




**DHAGEYSO!**

Dhageyso
**Podd-ka - Ny i Sverige-podden: Sidan ayaad shabakad ugu isticmaali kartaa Iswiidhan**

## Ayaad taqaanaa?

Buuxi oo qor xiriiradaada!



# Waxbarashooyin noocee ah ayaa igu habboon?

Shaqooyinka badankooda ayaad waxbarasho u baahan tahay. Waxaad dugsiga hoose dhexe ama dugsiga sare ka dhigan kartaa Komvux ama folkhögskola. Waxbarashooyinka intooda badan ayaad xaq u leedahay inaad lacagta waxbarashada ka dalbato CSN.

**Miyaad su'aalo waxbarashada ku saabsan qabtaa?**
La xidhiidh studie- och yrkesvägledaren ee degmadaada haddii aad qabto su'aalo kale oo ku saabsan waxbarashada.

**Waxbarashada arbetsmarknadsutbildning ayaa badanaa shaqo lagu helaa**
Waxbarashda arbetsmarknadsutbildning waa waxbarasho gaaban oo loogu talagalay xirfadaha halkaas oo ay ka jirto baahi shaqaale xirfad leh. La xidhiidh Arbetsförmedlingen si aad u ogaato haddii aad ka qaybqaadan karto waxbarasho sidaas oo kale ah.

**TALO!**

Haddii aad waxbarasho aad waddanka dibadiisa ka soo qaadatay leedahay ayaad ansixin kartaa. Markaas ayaad ogaan doontaa waxay waxbarashadaadu Iswiidhan u dhiganto.

## Waxbarashada ka dib ayay Ira Veronica heshay shaqo cunto dabbaakh/cunto kariye ah



Waxay Ira Veronica shaqo raadinaysay muddo afar sano ah. Laakiin waxay arbetsmarknadsutbildning kadib heshay shaqo dabbaakh/cunto kariye ah. Talooyinka ay bixinayso si shaqo loo helo ayaa ah inaad ka fikirto waxa aad rabto inaad ku shaqeyso oo aad ogaato waxay waxbarashooyinka kala duwani ka kooban yihiin.

– Waxbarashada ayaa ahayd mid aad u wanaagsan oo go'aamisay inaan shaqo helo, ayay tiri Ira Veronica. Waxay macallimiintu ahaayeen dabaakhyo xirfad leh. Waxa sidoo kale fiicnayd in la helo

Shabakadda ay waxbarashadu bixisay. Waxa shaqo la ii soo bandhigay inta aanan waxbarashadayda dhammaysan horteed, laakiin waxaan rabay inaan shahaadadayda qaato maaxaa yeelay waxay u fiican tahay mustaqbalka.

Waxay Ira Veronica Köpenhamn uga soo shaqaysay sida qofka sameeya macmacaanka. Laakiin Iswiidhan ayay adkeyd in shaqo lagu helo. Maalin maalmaha ka mid ah ayey Ira Veronica booqasho ugu tagtay waxbarasho ku saabsan barashada dabaakhnimadda. Waxa soo baxday inay waxbarashadaasi iyada ku habboon tahay!

– Qaybta ugu xiisaha badan ee shaqada waa bey'adda iyo iskaashiga aan la leenahay asxaabtayda ila shaqaysa, ayay tiri Ira Veronica.

# Taageero noocee ah ayaan ka heli karaa Arbetsförmedlingen?

Laba nooc oo taageerada ahi waa nystartsjobb iyo introduktionsjobb. Waxay kuwaasi ka dhigan yihiin in shaqo bixiyuhu kaalmo dhaqaale heli doono marka uu adiga ku shaqaaleeyo. Waxay adiga kaaga dhigan tahay inaad hesho fursad aad shaqo ku hesho. Habka wanagsan oo khibrad lagu kasbado waa in tababar shaqada lagu sameeyo goob shaqo.

La xidhiidh Arbetsförmedlingen si aad ugu ogaato haddii aad tababar shaqo samayn karto ama haddii aad fursad u leedahay nystartsjobb, introduktionsjobb ama taageero kale.



## Nystartsjobb ayaa Grace ka caawisay inay shaqo macalin xisaabta ah hesho

Waxay Grace Iswiidhan ugaga timid Suuriya sannadkii 2014. Waxay Suuriya jaamacadda ugaga soo baxday xisaabta iyo tirokoobka xisaabta, waxaanay taqaannay Ingiriiska iyo Carabiga. Hase yeeshee may helin waqti ay ku shaqeyso waxbarashadeeda kadib, sidaas darteed may lahayn khibrad shaqo. Waxaanay sido kale Iswiidhan ku haysan xiriir sidaas darteed waxay ku adkeyd inay shaqo hesho.

– Waxaan go'aansaday inaanan is-dhiibin ee aan dagaalka sii wado. Waxaan Iswidhishka ka bartay Youtube-ka waxaanan qaatay liisanka gaariga si aan fursadahayga shaqo ugu kordhiyo, ayay tiri Grace

Kama danbeys waxay Grace la xiriirtay qaybta suuqa shaqada ee degmadeeda. Waxay Grace ka caawiyeen nystartsjobb si ay shaqo dugsi uga hesho. Waxay maanta Grace isla dugsigaa kaga shaqeysaa macallin xisaabta.

– Nystartsjobb la'aanteed, ayaanan heleen fursadan, ayay tiri Grace.

### Miyaad ka fekertay inaad bilowdo ganacsi adiga kuu gaar ah?

Waxaad caawimaad ka heli kartaa Arbetsförmedlingen haddii aad rabto inaad bilowdo ganacsi adiga kuu gaar ah. Waxaad sidoo kale wax dheeraad ah ka akhrisan kartaa verksamt.se.

# Qoyska iyo shaqada

**Qaybtani waxay ku saabsan tahay**

- **mas’uuliyadda la wadaago ee guriga iyo carruurta**
- **dugsiga xannaanada ee Iswiidhan.**

## Sidee ayaan iskugu qaban karaa shaqo iyo inaan guriga daryeelo?

In la shaqeeyaa waxay saamaysaa dhaqaalaha qoyska iyo waxa aynu heleyno marka aynu hawlgab noqono. Haddii ay labada waalidba shaqeeyaan, ayay si gaar ah muhiim u noqon kartaa in laga wada hadlo sida loo kala qaybsanaayo shaqada guriga iyo carruurta. Mas’uuliyadda la wadaago ee guriga iyo carruurta ayaa badanaa u fiican dadka dhammaantii, xitaa ilmaha ayaa fursad u helaaya inuu labada waalidba la joogo.

Iswiidhan ayaa labada waalidba leeyihiin tiro isku mid oo ah oo föräldrapenningdagar ah. Hooyooyinka iyo aabbayaashuba waxay si sharci ah u leeyihiin inay fasaxa waalidka qaataan.

**Maxaan u baahanahay si aan u helo dheelitirnaanta guriga iyo shaqada?**



## Maxay carruurtu dugsiga barbaarinta/xannaanada carruurta ku sameeyaan?

Helena Gutenberg waa macalimad luqadda Iswiidhishka iyo Ingiriska ah laakiin hadda waxay ka shaqeysaa dugsiga xannaanada carruurta. Halkan waxa ay kaga hadlaysaa sida ay u ekaan karto maalinta dugsiga xannaanada carruurta iyo sababta uu dugsiga xannaanadu muhiim ugu yahay horumarka carruurta.

– Waxay Dugsiga xannaanada carruurtu kobcinayaan luqadda iswidhishka, xisaabta, farsamada, hal-abuurka, sayniska iyo muusikada iyo qoob ka ciyaarka.



Waxay Helena ku dartay inay caruurtu sidoo kale bartaan inay u shaqeeyaan koox ahaan iyo la shaqaynta dadka kale, iyo inay kobciyaan isku-kalsoonida iyo is-dareen u damqashada dadka kale.

– Xirfadaha bulshada ee carruurtu ay ku kasbadaan dugsiga xannaanada ayaa aad u muhiim ah, waxayna noqdaan waxyaabo ay noloshooda dambe ee mustaqbalka u qaataan.

Markii la waydiiyay su'aasha waxay shaqadu ku wanaagsan tahay, Helena waxay ku jawaabtay:

– In aan faraq sameyn karo oo aan gacan ka geysto in ilmo kasta uu helo maalin xasilloon, ammaan ah oo horumarin leh!

Dugsiga xannaanadu waa inuu daryeelaa carruurta isla markaana uu baro waxyaabo cusub. Waxbarashadu waxay ka dhacdaa gudaha iyo bannaanka.



- Doorka dugsiga xannaanada carruurta
- Dugsiga xannaanada waxa loo sameeyey si waa-lidiintu ay u awoodaan inay shaqeeyaan. Waxay carruurtaadu xaq u leeyihiin dugsi xannaanada laga bilaabo hal sano, xitaa haddii aad shaqo la'aan ta-hay, aad waxbarasho ku jirto, ama haddii aad fasax waalidnimo ku jirto oo uu ilmuhu walaal leeyahay.

# Marka ay jiraan waxyaabo nolosha la xiriira oo adkeynaaya in la shaqeeyo

**Waxaad qaybtan ka heli doontaa macluumaad ku saabsan caawimada aad heli karto.**

## Socialtjänsten ayaa caawiya qoysas badan

Waxyaalaha aad ka heli karto caawimada waxaa ka mid ah waalidnimadaada, dhaqaalahaaga iyo haddii adiga ama carruurtaadu ay naafo yihiin ama laydiin geysto xadgudub

**Haddii adiga laguu geysto xadgudub**
Socialtjänsten waxay ku siin karaan adiga iyo carruurtaada ilaalo iyo taageero, si aad u hesho fursad aad uga baxdo xaalad xadgudubka leh.

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa heeganka dumarka (kvinnojour ) haddii adiga laguu geysto xadgudubyo. Xiriirka aad la samaynayso heeganka dumarku (kvinnojouren) ayaad noqon kartaa qof aan la sheegin/ qarsoodi ah.

**Caawinta dhaqaalaha iyo hoyga**
Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad hoy hesho. Laakiin haddii aanad haysan meel aad ku noolaato ama aad halis ugu jirto in guriga lagaa saaro, ayaad socialtjänsten la xiriiri kartaa si aad talo iyo taageero uga hesho. Haddii aad caawimo uga baahan tahay inaad kiradaada bixiso ayaad kaalmo dhaqaale dalban kartaa. Waxa uu Socialtjänsten sidoo kale ku siin karaa taageero haddii ay kugu adagtahay in aad nolol maalmeedkaaga dabooli kari weydo ama haddii deyn lagugu leeyahay.

**La xiriir socialtjänsten ee degmadaada haddii aad caawimo raadsaneyso.**

**Kaalmada nolol maalmeedka ee dadka naafada ah**
Waxa uu Socialtjänsten ku siin karaan noocyo kala duwan oo caawimo iyo taageero nolol maalmeedkaaga ah haddii adiga ama ilmahaagu aad tihiin dad naafo ah.

Haddii ay kugu adag tahay inaad shaqeyso naafanimo ama jirro darteed, waa inaad u sheegtaa Arbetsförmedlingen.

**Haddii aad la kulantay takoorid (diskriminerad )**

Takoorku waa marka qof kuula dhaqmo si sida dadka kale loola dhaqmaayo ka xun, taas oo tusaale ahaan ku salaysan, da'daada, jinsiyaddaada, ama inaad tahay qof dumar ah. Haddii aad la kulanto takoorid, ayaad xaq u leedahay inaad hesho caawimaad. Markaas ayaad la xiriiri kartaa hey'adda Diskrimineringsombudsmannen (DO).

# Maxay tallaabadaada xigtaa noqon doontaa?

Hadda marka aad soo gaartay boggii ugu dambeeyey, ayaa laga yaabaa inaad heshay aqoon cusub iyo fikrado badan oo ku saabsan waxa aad samayn karto. Mar kale rogrog buug-yarahaaga oo ka fikir waxa ay tallaabada xigta noqon doonto. Fadlan kedso buug-yarahaaga si aad isku xusuusiso talooyinka, oo laga yaabaa inaad sidoo kale aqoon cusub mustaqbalka ku darto!

**Waxaanu ku soo gunaanadaynaa meeshii aanu ka bilaawnay, waxaananu kuu rajaynaynaa nasiib wanaagsan!**

Buug-yarahan waxa iska kaashaday Migrationsverket, Försäkringskassan, Socialstyrelsen, Jämställdhetsmyndigheten iyo Arbetsförmedlingen kuwaas oo ay ujeeddadeedu tahay in la fududeeyo sidii haweenka ajaanibka ahi ay suuqa shaqada uga mid noqon lahaayeen. Hindisuhu waa qayb ka mid ah waxqabadyada dawladda.

ARBETSFÖRMEDLINGEN
SWEDISH PUBLIC EMPLOYMENT SERVICE
Försäkringskassan
JÄMSTÄLLDHETS MYNDIGHETEN
Migrationsverket
Socialstyrelsen